



War Saxaafadeed

Sebtamber 30, 2021

Kala Xiriir: mediarelations@pps.net

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay xoojinayaan iskaashiga ay la leeyihii Barashada Waxyaabaha Cusub ee Shirkada Verizon ayna ku ballaarineyso in la helo teknoolajiga

*In ka badan 2,500 arday oo wax ka barta afar iskuul oo dheeraad ah ayaa la siiyaan qalab
bilaash ah, internet iyo inay helaan barnaamijyada lagu barto waxyaabaha cusub*

PORLAND, ORE.—Iyada oo [Dugsiyada Dadweynaha Portland](#) (PPS) ay dardar galinayaan inay noqdaan degmo iskuuladoodu addeegsadaan teknoolajiga casriga ah, waxaanu ku dhawaaqeynaa ballaarinta iskaashiga aan la leenahay barnaamijka Barashada Waxyaabaha Cusub Iskuulada ee Verizon (Verizon Innovative Learning Schools) oo siin doona qalab farsamo in ka badan 2,500 arday oo ka kala tirsan dugsiyada dhexe ee George, Kellogg, iyo Lane iyo Dugsiga Sarre ee Roosevelt. Dugsiyadani waxay ku soo biiri doonaan iskuuladii hore ee la siiyey sanadkii aan soo dhaafnay qalab farsamo oo ka badnaa 1,000.

“Sanad-dugsiyeedkii aan soo dhaafnay, waxaynu ognahay in teknoolajiga dijitalka ahi inuu noqday qalabka ugu muhiimsan dhinaca waxbarashada, waxaanu si weyn ugu mahadcelineynaa shirkada Verizon inay tahay saaxiibkayaga ugu muhiimsan dadaaladayada aan ugu jirno inay dugsiyada degmadayadu noqodaan kuwa ku qalabeysan teknoolajiyada casriga ah taasi oo awooda u siineysa inay addeegsadaan arday kastaa,” waxaa sidaasi yiri Don Wolff, Madaxa Xafiiska Teknoolajiyada PPS.

Iyada oo iskaashi lala sameynayo Ballanqaadka Dijitalka ([Digital Promise](#)), barnaamijkani wuxuu ardayda siyyaa qalab bilaa lacag ah, sidii ay internet u heli lahaayeen iyo barnaamijyada barashada waxyaabaha cusub. Hindisayaashani waxay ku guuleysteen abbaalmarin sababtoo ah waxay farta ku fiiqayaan sidii ay wax uga qaban lahaayeen caqabadaha hor taagan inay ardayda Maraykan ku nooli helaan dhammaantood qalab dijital oo ka caawiya waxbarashada.

Qalabeynta jiilka xiga ee dhinaca teknoolajiyada, qaababka waxbarashada loogu qaato teknoolajiyada, iskuul kasta waxa lagu qalabeeley la taliye dhinaca teknoolajiyada kaasi oo siinaya tababaro taageerada horumarinta xirfadaha ah macallimiinta sidii ay si waxtar leh casharada fasalada ay bixiyaan ugu dari lahaayeen teknoolajiyada. Macallimiinta qeybta ka ah barnaamijka waxa ay soo wariyeen in dadaaladani u diyaariyeen sidii ay wax ugu dhigi lahaayeen ardayda marka ay guryahooda ku sugar yihiin, sidoo kalena ay u saamaxday inay casharo fara badan si gaar ah arday kasta oo u khash ah loo siin lahaa iyo kor u qaadista inay ardaydu ka qeybqaataan casharada fasalada ka socda.

"In badan oo ka mid ah ardayda wadanka ayey ku adkayd helitaanka teknoolajiyadu iyo agabyada ay u baahan yihiin sidi ay ugu guuleysan lahaayeen dunida dijitalka ee maanta," sidaasi waxaa yiri Alex Leupp, oo ah agaasiimaaha fulinta arrimaha dibada iyo arrimaha gudaha dawlada ee Verizon. "Aniga oo ku hadlaya magaca shirkada Verizon, waxaan aad ugu faraxsanahay inaan taageerno in ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland awood u yeeshaan sidii ay u horumarin lahayeen xirfadahooda, aqoontooda iyo karitdooda ee sidii ay mustaqbal rajo leh u heli lahaayeen."

Afartan dugsi ee cusub waxay qeyb ka yihiin 246 iskuul cusub oo wadanka ah, kuwaasi oo ku soo biiraya barnaamijka Barashada Waxyabaha Cusub Iskuulada ee Verizon sanad-dugsiyeedka 2021-22.

Hindisayaashani ayaa waxay ku qalabeynayaan agabka teknoolajiyada ugu yaraan 183,000 arday oo cusub iyada oo barnaamiju uu saameyn ku yeelanayo in badan 500 dugsi oo ku kala yaala wadanka, Shan Dugi oo ka mid ah Dugsiyada Dadweynaha Portland nooca loo yaqaan PPS Title I kalena ah (dugsiga Marysville K-8, dugsiga Cesar Chavez,Dugsiga Faubion K-8, Dugsiga Lent K-8, Dugsiga Harrison Park K-8) ayaa [ku soo biiray](#) sanad-dugsiyeedka 2020-21.

Haddaba si loogu dabaaldega ka qeybqaadashada barnaamijka ayey Dugsiyada Dadweynaha Portland ku qabteen Dugsiga Sarre ee Roosevelt munaasabada xadhiga lagaga jarayo bishii Sebtamber 29keedii iyada oo arday kastaba lagu guddoonsiinayey qalabkoodii. Fiidiyaashii laga duubay munaasabada waxaad heli kartaan marka aad soo codsataan.